

Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneya ee DPS

Kulanka 2aad / Caqabadaha Hoosu-dhaca Diiwaangelinta, 16ka Maajo, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Xubnaha guddiga waxay u shaqeynayaan kooxo ah min laba ama saddex si ay wax kasta isula eegaan. Hawsha waxaa lagu furay si diirran si la isugu diyaariyo in loo sii shaqeeyo si wanaagsan. Wakhtiga kulanka oo yaraa awgiis ma aannan helin inaan ka doodno ama aan si koox weyn ah u wada hadalno.</p>
Dibu-eegidda iyo xoojinta baaxadda mashruuca iyo awoodda suuroobeysa ee kharashka	<p>Qeybtan waxaa hogaanka u hayey Grant oo taageero ka helaayey Ericka. Waxaa la xoojiyey arrintii fikradaha ahayd ee</p> <ul style="list-style-type: none"> ● guddiga oo awood loo siiyey in ay sameeyaan shuruudo loo isticmaalo xiritaanka iyo isku-darista iskuullada. ● Weli waxaa jira su'aalo badan oo ku saabsan sida ay noqon karaan shuruudaha iyo sida ay dadka u saameyn doonto.
Heshiisyo	<p>Qeexidda guusha waxaa lagu cusboonaysiiyey talooyin ka yimid xubnaha guddiga. Waxaa jirtay in waxoogaa la isku raacay in lagu sii dhaqmo wixii la qoray. Heshiisyada kooxda lama dhameystirin wakhtiga oo yaraa awgeed. Waxa jiray waxoogaa arrimo cusub oo la soo jeediyey balse aan laga hadlin ama aan la ansixin. Talooyinkaas waxaa lagu soo diri doonaa boostada internetka oo waxaa looga hadli doonaa kulanka seddexaad.</p>
Xogfahmid	<p>Waxa "Xogfahmida" lala sameeyey laba kooxood oo ku hadlaayey Ingiriis & Isbaanish. Xogtu waxay ka koobneyd shan xarumood ama mawduucyo leh fursado looga falceliyo bilowga hore iyo saameynta suurtagalka ah ee qoysaska, bulshooyinka, iskuulka, iwm. Ka-qeybgaleyaashu waxay xogta kasta ka eegaan dhinacyo badan iyo qaar ka mid ah saameynta ay ku leedahay hoosu-dhaca diiwaangelinta. Mawduucyada xarumuhu waxay ahaayeen:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Denver oo ah magaalo is-beddeleysa ● Is-beddellada Diiwaangelinta DPS ● Kala-doorashada Iskuulka ● Maaliyadda/Miisaaniyadda & Waxyaabaha/Is-diiwaangelinta ● Sharciyada Colorado ee Iskuullada Jaatarka

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Eegista natiijooyinka xogfahmida iyo wixii lala kulmay	<ul style="list-style-type: none"> ● Kooxda 1aad: Waxay ka hadleen saameynta qoysaska iyo bulshada. Hoosu-dhaca diiwaangelinta waxay la mid tahay maalgelin yar. U fiirso isku-darista iskuullada inay tahay fursado aan ahayn khasaaro. ● Kooxda 2aad: Diiwaangelinta oo hoos u dhacaysa waa dhibaatooyin is-biirsaday... khasaare joogto ah. ● Kooxda 3aad: Waxaa looga hadlay welwelka iskuullada, arrimaha dhaqaalaha bulshada ee ku saabsan maalgelinta, iyo sida go'aamada loo gaarayo. Diiradda waxaa la saaray saameynta carruurta iyo qoysaska. Yaa ka faa'iideysanaya talooyinka? Shuruudaha waxay keeni karaan sinnaan la'aan. ● Codsii dheeraad ku ah xogta: Miyey jiraan dareen ah waxa DPS ay dooneyso in ay ku sameyso kaalmada miisaaniyadda? Jawaab: Nooc ka mid ah kaalmada ayaa had iyo jeer diyaar noqon doona, laakiin lacagaha COVID ee dheeraadka ah ayaa meesha ka baxaysa.
Tallaabooyinka Xiga	<ul style="list-style-type: none"> ● Aqoonsiga welwelka laga qabo xogfahmida. Kuwee baa ugu muhiimsan? ● Maxaa kale oo ay tahay in la tixgeliyo? ● Fududeynta fikradaha ● Ka-hadalidda mabaadi'da hageysa sameynta shuruudaha